



# Munaasabadda nololwanaagga keynta 28.10.2023



Transformative Adult Learning  
for Green Transition

**Wakhtiga:** saacadda 13.00-16.00 keynta Kivikko

**isu imaatinka:** ardaaga ama qaybta hore ee bannaanka ee Daarta dadweynaha  
(Asukastalo Kivenkolo), Kivikonkaari 11, Helsinki

Kaalay oo ka qaybqaado galabta dabeecadda ee Kivikko! Waxaad ka qaybqaadan kartaa barnaamij la hagaayo oo jimicsi caafimaad ah oo la yiraahdo Asahi (qiyaastii saacadda 13-14) iyo socod aan ku aadaynno dhanka keynta (qiyaastii saacadda 14-15), xilligaas waxaad maqli doontaa arrimaha ay ka midka yihiin saamaynta nololwanaageed ee dabeecadda, noolayaasha keynta dhexdeeda ku nool iyo mid walbaa xuquuqdiisa. Marka socodku noo dhammaado waxaa la bixin doonaa bullo iyo cabitaan fereesh ah.

Isa soo diiwaangeli illaa iyo ugu dambayn 26.10., si aan u ogaanno inta qof ee imaanaysa oo aan ugu diyaarinno cunto iyo cabitaan fudud. Waxaad iska diiwaangelisaa: <https://bit.ly/kivikkometsa> Sidoo kale waad ka soo qaybgeli kartaa, xittaa adigoo aan isa soo diiwaangelin.

Macluumaadka dheeraadka ah:  
kivikonmetsanpuolesta@gmail.com  
Tel: 0417594154



- Barnaamijku wuxuu ku bixi doonaa luqadda finishka, laakiin ka qaybqaadashada barnaamijkan shardi uma ahan inaad si wanaagsan luqadda finishka u taqaanno.
- Haddii ay jirto xaalad roob ama dabaylo aad u daran ah, munaasabadda waa la baajinayaa, macluumaadka arrinkaas ku saabsanna waxa lagu soo qorayaa bogagga internetka.
- Fadlan waxaad ogaataa, in ka qaybgalayaasha munaasabaddan aanay wax caymis ah ku lahayn qabanqaabiyayaasha munaasabaddaan.

Qabanqaabiyayaasha:  
Ururka Kivikon metsän puolesta -verkosto iyo  
Waqfiga Tale-hanke, Kvs-säätiö

Sawir ka qaad koodka QR-ta,  
waxaadna ka akhrisaa  
faahfaahinta dheeraadka ah  
ee arrinkaan ku saabsan.



Euroopan unionin  
osarahoittama



Kivikon metsän puolesta



kivikonmetsanpuolesta



kivikonmetsanpuolesta.blogspot.com

